

# Alternate ACCESS for ELLs Fahanka Buundooyinka Ilmahaaga

**Alternate ACCESS for ELLs waa imtixaanka ku wanaagsanaanta luqadda Ingiriisiga ee ku qiyaasa xirfadaha tacliinta luqadda ingiriisiga ee ardayda qabta naafooyinka garaadka ugu badan.**

- Dugsiyada, degmooyinka dugsiya, iyo goboladu waxay isticmaalaan buundooyinka ACCESS for ELLs markay go'aan ka gaadhaan waxa taageerada luqadda Ingiriisiga ee la bixinayo,
- Macalimiintu waxay u isticmaalaan buundooyinka imtixaanka marka ay go'aan ka gaadhayaan sida ugu wanaagsan ee wax loo baro ilmahaaga.
- Waxaa isticmaali kartaa buundooyinka imtixaanka si aad ugu doodo ilmahaaga.



Warbixinta Ardayga Shaqsiya ah wuxuu muujinayaa buundooyinka ilmahaaga ee Alternate ACCESS for ELLs oo sideed qeybood oo kala duwan. Afar ka mid ah qeybahaan waa qaybaha luqadda Dhageysiga, Hadalka, Akhriska, iyo Qorista. Buundooyinkan afartan qaybood ee luqadda ayaa la isku daray si loo aburo afar nooc oo buundooyin dheeraad ah:

- Qaybta luqadda hadalka ah waa isku darka Dhegaysiga ilmahaaga iyo buundooyinka Hadalka.
- Qaybta wax akhriska waa isku darka Akhriska Ilmahaaga iyo buundooyinka Qoraalka.
- Qeybta fahamka waa isku darka buundooyinka Dhageysiga iyo Aqrinta canugaaga. Waxay wax badan ku xiran tahay buundada Akhriska badelkii buundada Dhageysiga.

## ELL

Ardayga luqadda Ingiriisiga, ama ELL, waa arday haysta fursada si uu u helo tilmaamaha Ingiriisiga ah, marka lagu daro qaadashada fasalada. ELLs waxaa laga qaadaa imtixaan sanad kasta si loo caawiyo macalimiintu inay fahmaan xirfadahooda luqadda, laakiin waxaad leedahay xaqa inaad aqbasho ama diido taageerada luqadda.

## Qaybta Luqadda

Ardaydu waxay isticmaalaan dhegaysiga, hadalka, akhriska, iyo xirfadaha qoraalka si ay u bartaan macluumaadka akaadeemiga, u wadaagaan macluumaad, oo u falan qeeyaan fikradaha. Kuwan waa xirfadaha ay dhammaan ardaydu ku shaqeeyaan dhammaan waxbarashooda. Imtixaamida luqaddu waxay qiyaastaa xirfadaha ardayga ah ee dhammaan afartan qaybood.

- Qaybta guud ahaaneed waa isku darka dhammaan afarta qaybta buundooyinka luqadda. Waxay ku xidhan tahay wax badan Akhriska iyo Buundooyinka Qoraalka halkii ay ka ahaan lahayd buundooyinka Dhegaysiga iyo Hadalka.

Mid kastoo ka mid ah sideeda qaybood ee Warbixinta Ardayga Gaarka ah, waxaa jira labba buundooyin ah.

- Heerka Buundooyinku waxay geeyaan xirfadaha ilmahaaga gudaha lixda Beddelka WIDA Heerarka Ku wanaagsanaanta Luqadda Ingiriisiga. (Heerarka ku wanaagsanaanta lama xidhiidhaan heerka fasalka ardayga.) Bogga saddexaad ee Warbixinta Ardayga Gaarka ah waxay faahfaahisaa xirfadaha luqadda la midka ah heer kasta oo ku wanaagsanaanta ah.
- Buundooyinka qiyaasta waa qiyaaso dhab ah oo ah sida ilmahaagu ka sameeyay imtixaanka. Waxay ku xisaabtamaan heerka fasalka ilmahaaga iyo dhibaataada waxyaabaha imtixaanka ilmahaagu dhammaystiray. Macalimiinta waxay isticmaalaan buundooyinka si loo fahmo inta ay leegtahay xirfadaha luqadda ilmahaaga ee korodhay laga bilaabo wakhtigii u dambeeyay ee ilmahaagu uu qaatay Alternate ACCESS for ELLs.

## Ku wanaagsanaanta Luqadda

Heerka ku wanaagsanaanta Luqadda waa qiyaasta halka ardaydu ay ka marayaan nidaamka joogtaada ah ee dhisida xirfaddaha luqadda. Marka ardaydu gaadhaan heerarka ugu sareeya ee ku wanaagsanaanta, in dheeraad ah uma baahna adeegyada taageerada luqadda.

## Su'aalaha aad waydiin karto

- Maxay buundadu la macno tahay? Kumaa arki doona buundada iyo sidee loo isticmaali doonaa? Sababtee buundadu u maqan tahay?
- Sidee buundooyinka sanadkan loo barbar dhigaa buundooyinkii hore? Ilmahaygu horumar ma ka samaynayaa dhisida xirfadaha luqadda Ingiriisiga? Macluumaadkee kale ayaad isticmaashaa si loo qiyaaso horumarka?
- Sidee barashada Ingiriisigu ugu habboon tahay xirfadaha kale ee ilmahaygu baranayo? Sidee taageerada luqaddu uga duwan tahay taageerada wada xidhiidhka kale ee adeegyada ilmahayga?
- Miyay buundadu beddeli doontaa tilmaana ama taageerada ilmahaygu helo? Sideen go'aan ku gaadhaa marka ilmahaygu uu joojiyo helida taageerada luqadda?

Degmooyinka dugsiga waxay u isticmaalaan buundooyinka **Alternate ACCESS for ELLs** inay ku qiimeeyaan barnaamijyada taageerada luqadda, kor kala socdaan horumarka ardayga, iyo sida hal sabab oo go'aanka looga saarayo ardayga adeegyada taageerada luqadda. Imtixaanka Alternate ACCESS for ELLs wuxuu u ogolaanayaa dugsiyada inay buuxiyaan shuruudaha la xisaabtanka gobolka iyo faderaalka.